

KU DHAQAN XAFIIS D.

FAAFIN



RASMI AH

الرسمية

الجريدة

EE JAMHURIADDÁ DIMUQRADIGA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad

Muqdisho, 10 Abbril 1975

L. 1, R. 4

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilij — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### BOGGA KOWAAD

#### SHARCI

- SHARCI L. 29, Tr. 12 Marso 1975 — *Qodobka 1aad ee Xeerka tirsigiisu yahay 52 soona baxay 1dii Sebtember 1970, waxaa lagu siyaadiyey, Laamaha Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Gobollada.* Bog. 363
- SHARCI L. 30, Tr. 2 Abbril 1975 — *Toosin Sharci Lamb. yahay 15 soona baxay 30-1-1975.* » 364
- SHARCI L. 30, Tr. 2 Abriil 1975 — *Toosin Sharci Lamb. Huga garsooridda (taga).* » 365

### BOGGA LABAAD

#### X E E R

- XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 20 Disember 1974, L. 64 — *Koobnaanta cusub ee Guddiga Kacaanka Gobalka Bay.* » 367

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-  
CAANKA, Tr. 20 Disember 1974, L. 65 — *Dhismo  
Guddiga Kacaanka ee Gobollada cusub; Gedo, Bakol,  
Sannaag iyo Galguduud.*

Bog. 368

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-  
CAANKA, Tr. 6 Marso 1975, L. 66 — *Billad Maar  
Hawlkarnimo oo lagu maamuusay Shaqaale ka tirsan  
ciidammaddii O.H.R.M..*

## BOGGA SADDEXAAD

### TALOOPYIN ISGAARSIIN OGELSIIS IYO WIXII LA MID AH

- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 5 Abbril 1975 —  
Beddelaad Naado Dhul, *Maxamed Nuur Maxamed, Cali  
Maxamed Hiraabe, Maxamed Raage Cabdulle iyo Ax-  
Med Nuur.* (60) Bog. 379
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 5 Abbril 1975 —  
Naado Dhul *Ibrahim Munye Maxamed.* (61) » 379
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 5 Abbril 1975 —  
Naado Dhul, *Maxamud Cabdullahi Dhure.* (62) » 380
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 5 Abbril 1975 —  
Beddelaad Naado Dhul, *Xasan Aadan Cabdi.* (63) » 380
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 5 Abbril 1975 —  
Beddelaad Naado Dhul, *Maxamed Nuur iyo Maxamed  
Xasan Maxamed.* (64) » 381
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 5 Abbril 1975 —  
Beddelaad Naado Dhul, *Maxamuud Raage Cabdulle,  
Axmed Maxamuud Nuur.* (65) » 381
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 19 Marso 1972  
Naado Dhul, *Jaallaha la yirahdo Khalif Roble Warfa.  
Naado Dhul, Jaallaha la yirahdo Khalif Roble Warfa.*  
(66) » 382
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 8 Abbril  
1975 — *Bugga Lacagta L. 5416 Shs. 5.900, uu leyahay  
Jaalle Cali Xeyle Wardheere.* (67) » 382
- MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE, Tr. 20 Abbril  
1975 — *Jeegga Wareegto L. 3530 Shs. 500, uu leyahay  
Cabdulraxmaan Moxamed Xasan. Ku celin* (67) » 383

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 29, Tr. 12 Marso 1975.

Qodobka 1aad ee Xeerka tirsigiisu yahay 52 soona baxay 1dii Seteember 1970, waxaa lagu siyaadiyey, Laamaha Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Gobollada.

### GUDDOOMIYAHA

#### GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

MARKUU AKRAY Sharciga tirsigiisu yahay 3 ee 10kii Jannaayo 1970, Sharciga tirsigiisu yahay 7 ee 21kii Jannaayo 1970, Sharciga tirsigiisu yahay 52 ee soo baxay 1dii Seteember 1970kii iyo Sharciyadii iya-gaas lagu toosiyey;

MARKUU TIXGELIYEEY Go' aankii ay isku raaceen Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha;

### WUXUU SOO SAARAY

#### Qodobka 1aad

Iyada oo loo dhaafay sida uu sheegay (fermo restando le dispozizioni) qodobka koowaad ee Xeerka tirsigiisu yahay 52 soona baxay 1dii Seteember 1970kii, waxaa lagu siyaadiyey.

Laamaha Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Gobollada waxaa Guddoomiye ka noqon kara.

Sarkaal ka tirsan Ciidammada Qalabka Sida amase Garsoore ka tirsan Wasaaradda Caddaaladda oo mid kasta lagu magacaabay Dekereetada Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka.

#### Qodobka 2aad

Markii uu Guddoomiye ka noqdo laan ka mid ah M.B.D. ee Gobollada Garsoore ka tirsan Wasaaradda Caddaaladda, Xubnaha kale waa in ay noqdaan Saraakiil ka tirsan Ciidamada Qalabka Sida oo uu magacaabo Guddiga Kacaanka ee Gobolka.

Qodobka 3aad

Guddoomiyaha M.B.D. ee Xamar waxaa awood loo siinayaa in uu Garsoore ka tirsan Wasaaradda Caddaaladda u magacaabi karo in uu ka noqdo Lataliye laan ka mid ah Laamaha MB..D. ee Gobollada, haddii ay la noqoto lagama maarmaan.

Qodobka 4aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa markii la saxiixo, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.  
Muqdisho, 12 Marso 1975.

GUDDOOMIYAHA  
GOLAHA SAREE EE KACAANKA  
*S. G. Maxamed Siyaad Barre*

---

SHARCI L.30, Tr. 2 Abril 1975.

Toosin Sharciga lambarkiisu yahay 15 soona baxay 30-1-1957, kuna saabsan qaybta ey ka qaataan Kaaliyaasha Maxkamadaha.

GUDDOOMIYAHA  
GOLAHA SAREE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Sharciga labarkiisu yahay 15 ee baxay 30-1-1957 oo hadda ka hor ka socday Gobollada Koonfureed oo keli ah;

ISAGOO AQOONSAN In la toosiyo Sharciga L. 15 ee soo baxay 30-1-1957 si ey Kaaliyaasha ka shaqeyya Maxkamadaha Gobollada Waqooyi u heli lahaayeen xuquuqdooda ka maqan;

ISAGOO TIXGELINAHA Taladii ay wadajir u soo jeediyeen Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta iyo Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Maaliyadda;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'qnkii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

Nidaamka ku qoran Sharciga lambarkiisu yahay 15 ee soo baxay 30-1-1957 kuna saabsan qaybta ganaaxa ey ka qaataan Kaaliyaasha Maxkamadaha oo hadda ka hor looga dhaqmi jiray Gobollada Koonfureed oo keli ah, waxaa laga hirgelinayaa Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya oo dhan.

Qodobka 2aad

Sharcigaan si degdeg ah buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.  
Muqdisho, 2 Abbril 1975.

GUDDOOMIYAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

---

SHARCI L. 31, Tr. 2 Abbril 1975.

Sharci ku saabsan huga garsooridda (toga).

GUDDOOMIYAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka:

ISAGOO ARKAY Sharciga Nidaamka Garsoorka tiradiisu yahay 34 ee soo baxay 22kii Oktoobar 1974;

ISAGOO AQOONSAN In lagama maarmaan ey tahay Garsoora-yaasha Dawladda, Xeer Ilaaliyaasha iyo Qareennada in Maxkamadda gudaheeda ey ku qaataan hu' (toga) midabkiisu cad yahay;

ISAGOO TIXGELINAYA Ra'yigii uu soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Kan Xoghayaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharci hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

*Huga Garsooridda*

1. Iyadoo la tixgelinayo hiddaha iyo dhaqanka wanaagsan ee Ummadda Soomaaliyeed ey gaar u leedahay, waxaa la sameeyey hu' (toga) cusub oo midibkiisu caddaan yahay.

2. Hugaas wuxuu ka kooban yahay laba go' oo midkiiba dherirkiisu yahay lix (6) dhudhun iyo koofiyad cad.

3. Labadaas go' midna kor baa laga qaadanayaa midna hoos.

Qodobka 2aad

*Dadka ey waajib ku tahay iney xirtaan*

1. Huga garsooridda waxey waajib ku tahay iney xirtan dadka hoos ku qoran:

- a) Garsoorayaasha Dawladda;
- b) Xeer Ilaaliyaasha;
- t) Qareennada.

2. Hugaas waxaa la xiranayaa markii garta lagu qaadayo Maxkamadda gudaheeda inta ey dacwaddu socoto cid kale ma qaadan karto aan ka ahayn kuwa kor lagu oo sheegay.

Qodobka 3aad

*Lama oggola in magaalada loo qaato*

Garsoorayaasha Dawladda, Xeer Ilaaliyaasha iyo Qareennada looma oggola in iyagoo xiran huga (toga) garsooriddi ula baxaan magaalada gudaheeda.

Qodobka 4aad

*Dhaqan gelin*

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa taariikhda marka laga hilaabo 16kii Febraayo 1975, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 3 Abbril 1975.

GUDDOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 20 Disember 1974, L. 64.

Koobnaanta cusub ee Guddiga Kacaanka Gobolka Bay.

### GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Qodobka 8aad ee sharciga lambarkiisu yahay 52, taariikh 8 juunyo 1972, lagu qoray faafinta rasmiga ah ee Dawladda ee 21-9-1972, Suppl. n. 1 ilaa n. 9;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 8 ee 15-1-1973, lagu qoray faafinta rasmiga ah ee Dawladda ee 1dii febraio 1973. lambar 2 oo wax looga bedelay sharciga lambarkiisu yahay 52 ee xaggan sare ku qoran;

ISAGOO ARKAY Xeer Madaxweynaha G.S.K. lambar 10862, taariikh 1-10-1972 oo lagu dhisay Guddiga Kacaanka Gobolka Jubbada Sare;

ISAGOO ARKAY Qodobka 1aad Xeer Madaweynaha G.S.K., lambrakiisu yahay 102, taariikh 26-9-1973, lagu qoray faafinta rasmiga ah ee Dawladda, taariikh 11-9-1973 oo Gobolkii hore loogu aqoon jiray Jubbada Sare saddexda Gobol loogu qaybshay;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO OGAADAY In ay tahay lagama maarmaan in la cadeeyo koobnaanta cusub ee Guddiga Kacaanka Gobolka Bay;

### WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

Tiiyoo dhismaha Guddiga Kacaanka Gobolka Bay uu ahaan doono sidii hore loogu dhisay Guddigii Kacaanka Gobolkii hore loogu aqoon jiray Jubbada Sare, ka bilaabanta 26 settember 1973, Xubnihii Guddiga waxaa laga reebay oo aan ka tirsanaan doonin Xubnihii isla Guddigaas ee ka iman jiray Degmooyinka lagu daray Gobollada cusub. Gedo iyo Bakool.

Qodobka 2aad

*Dhaqan gal*

Xeerkani 26 settembar 1973 ayuu dhaqan gelayaa waana in lagu qoro faafinta rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 20 Disembar 1974.

MADAWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
*S. G. Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Wasacradda

Arrimaha Gudaha

*S. Gaas Xuseen Kulmiye*

---

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

Tr. 20 Disember 1974, L. 65.

Dhismo Guddiyo Kacaanka ee Gobollada cusub: Gedo, Bakool, Sanaag iyi Galguduud.

**GUDDOONSHAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY**

*Diiwaanka lam. 1, bogga lam. 61.*

*Muqdisho, 30 Marso 1975.*

*Hantidhawraha Guud*

G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

ISAGOO ARKAY Qodobka 8aad ee sharciga lambarkiisu yahay 52, taariikh 8 Juunyo 1972, lagu qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda ee 21-9-1972, Suppl. lambar 1 ilaa 9;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 8 ee 15-1-1975, lagu qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ee 1dii Febbrayo 1975, lambar 2 oo wax looga beddelay sharciga lambarkiisu yahay 52;



ISAGOO ARKAY Qodobka 1aad Xeer Madaweynaha G.S.K. labarkiiisu yahay 102 taariikh 26-9-1973, lagu qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, taariikh 11-9-1973 ee Gobolkii hore loogu aqoon jiray Jub-bada Sare saddex Gobol loogu qaybiyey ee magacyadoodu kala yihiin Bay, Gedo iyo Bakool;

ISAGOO ARKAY Xeer Madaweynaha G.S.K. labarkiiisu yahay 66, taariikh 23-1-1973, lagu qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda 15-7-1973, lambar 13 BIS ee lagu dhisay Gobollada Sanaag iyo Galguduud;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO OGAADAY In ay tahay lagama maarmaan in Guddiyo Gobol laga dhiso Gobollada Gedo, Bakool, Sanaag iyo Galguduud;

## WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

### *Dhismaha Guddiyada Kacaanka ee Gobollada*

Guddi walba waxaa sharci ahaan wakiil ugu ah Guddoomiyahiisa.  
*Gedo, Bakool, Sanaag iyo Galguduud*

Ka bilaabato 26-9-1973, waxaa la dhisay Guddiyo Kacaanka ee Gobollada Gedo, Bakool, Sanaag iyo Galguduud oo loo aqoonsaday qof ahaan sharci daan'in ah oo saldhiggooda sharci ahaaneed kala yahay Xarunta Gobollada ee Garbahaarrey, Xuddur, Cerigaabo iyo Dhuusa Mareed.

Qodobka 2aad

### *Koobnaanta Guddiga Gobolka Gedo*

Guddiga Kacaanka Gobolka Gedo wuxuu ka kooban yahay lix Guddoomiye, oo hore loogu magacaabay Xeer Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka uuna ku soo taliyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, iyo Xubnaha halkan hoose ku taxan:

Taliyaha Qaybta Xoogga Dalka	Xubin
Taliyaha Qaybta Boliska	»
Taliyaha Qaybta Ciidanka Nabad Suggidda Soomaaliyeed	»
Taliyaha Qaybta Ciidanka Asluubta	»
Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka	»

Taliyaha Waxbarashada Gobolka	»
Agaasimaha Caafimaadka Gobolka	»
Isuduwaha Hawlaha Lacagta	»
Madaxa Hawlaha Guud ee Gobolka	»
Madaxa Hawlaha Shaqada iyo Ciyaaraha ee Gobolka	»
Madaxa Hawlaha Caafimaadka Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa	»
Madaxa Hawlaha Beeraha	»
Madaxa Hawlaha Biyaha Gobolka	»
Madaxa Hawlaha Boostada iyo Isgaarsiinta	»
Madaxa Xafiiska Siyaasadda Madaxtooyada G.S.K. Gobolka	»
Agaasimaha Wakaaladda Horumarinta Beeraha	»
Agaasimaha Wakaaladda Ganacsiga Ummadda	»
Agaasimaha Wakaaladda Horumarinta Xoolaha	»
Agaasimaha Wakaladda Batroolka Ummadda	»
Agaasimaha Bangiga Gobolka	»
Madaxda Gaadiidka Dawladda ee Gobolka	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Garbahaarrey	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Baardheere	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Luuq-ganaane	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Guulo Xaawo	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Doolow	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Ceel-waaq	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Saakow	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Garbahaarrey	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Luuq-ganaane	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Baardheere	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Buulo Xaawo	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Doolow	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Saakow	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Ceel-waaq	»

Qodobka 3aad

*Xoghayaha Guddiga Kacaanka Gobolka Gedo*

Xoghayaha Guddiga Kacaanka Gobolka oo hore loogu magacaabay Xeer Guddoomiyaha G.S.K. uuna ku soo taliyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, wuxuu fulinayaa waajibaadka shaqada ku tilmaaman qodobka 9aad ee sharciga lambarkiisu yahay 52 ee xaggan sare ku qoran.

Qodobka 4aad

*Koobnaanta Guddiga Kacaanka Gobolka Bakool*

Guddiga Kacaanka Gobolka Bakool wuxuu ka kooban yahay hial Guddoomiye, oo hore loogu magacaabay Xeer Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka uuna ku soo taliyey Xoghayaha Dowladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, iyo Xubnaha halkan hoose ku taxan:

	Xubin
Taliyaha Qaybta Xoogga Dalka	
Taliyaha Qaybta Boliska	»
Taliyaha Qaybta Ciidanka Nabad Suggidda Soomaaliyeed	»
Taliyaha Qaybta Ciidanka Asluubta	»
Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka	»
Taliyaha Waxbarashada Gobolka	»
Agaasimaha Caafimaadka Gobolka	»
Isuduwaha Hawlaha Lacagta	»
Madaxa Hawlaha Guud ee Gobolka	»
Madaxa Hawlaha Shaqada iyo Ciyaaraha ee Gobolka	»
Madaxa Hawlaha Caafimaadka Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa	»
Madaxa Hawlaha Beeraha	»
Madaxa Hawlaha Biyaha Gobolka	»
Madaxa Hawlaha Boostada iyo Isgaarsiinta	»
Madaxa Xafisika Siyaasadda Madaxtooyada G.S.K. ee Gobolka	»
Agaasimaha Wakaaladda Horumarinta Beeraha	»
Agaasimaha Wakaaladda Ganacsiga Ummadda	»

Agaasimaha Wakaaladda Horumarinta Xoolaha	»
Agaasimaha Wakaaladda Batroolka Ummada	»
Agaasimaha Bangiga Gobolka	»
Madaxa Gaadiidka Dawladda ee Gobolka	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Xuddur	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Waajid	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Yeed	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Ceel-berde	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Tiyeeglow	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Xuddur	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Waajid	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Yeed	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Ceel-berde	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Tiyeeglow	»

#### Qodobka 5aad

##### *Xoghayaha Guddiga Kacaanka Gobolka Bakool*

Xoghayaha Guddiga Kacaanka Gobolka oo hore loogu magacaabay Xeer Guddoomiyaha G.S.K. uuna ku soo taliyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, wuxuu fulinayaa waajibaadka shaqada ku tilmaaman qodobka 9aad ee sharciga lambarkiisu yahay 52 ee xaggan sare ku qoran.

#### Qodobka 6aad

##### *Koobnaanta Guddiga Kacaanka Gobolka Sanaag*

Guddiga Kacaanka Gobolka Sanaag wuxuu ka kooban yahay hal Guddoomiye, oo hore loogu magacaabay Xeer Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka uuna ku soo taliyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, iyo Xubnaha halkan hoose ku taxan:

Taliyaha Qaybta Xoogga Dalka	Xubin
Taliyaha Qaybata Booliska	»
Taliyaha Qaybta Ciidanka Nabad Suggidda Soomaaliyeed	»
Taliyaha Qaybta Ciidanka Asluubta	»
Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka	»
Taliyaha Waxbarashada Gobolka	»
Agaasimaha Caafimaadka Gobolka	»
Isuduwaha Hawlaha Lacagta	»
Madaxa Hawlaha Guud ee Gobolka	»
Madaxa Hawlaha Shaqaalaha	»
Madaxa Hawlaha Caafimaadka Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa	»
Madaxa Hawlaha Beeraha	»
Madaxa Hawlaha Biyaha Gobolka	»
Madaxa Hawlaha Boostada iyo Isgaarsiinta	»
Madaxa Xafiiska Siyaasadda Madaxtooyada G.S.K. ee Gobolka	»
Agaasimaha Wakaaladda Horumarinta Beeraha	»
Agaasimaha Wakaaladda Ganacsiga Ummadda	»
Agaasimaha Wakaaladda Horumarinta Xoolaha	»
Agaasimaha Wakaaladda Batroolka Ummadda	»
Agaasimaha Bangiga Gobolka	»
Madaxa Gaadiidka Dawladda ee Gobolka	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Ceerigaabo	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Laas-Qoray	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Gar-adag	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Cerigaabo	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Laas-Qoray	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Gar-adag	»

Qodobka 7aad

*Xoghayaha Guddiga Kacaanka Gobolka Sanaag*

Xoghayaha Guddiga Kacaanka Gobolka oo hore loogu magacaabay Xeer Guddoomiyaha G.S.K. uuna ku soo taliyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, wuxuu fulinayaa waajibaadka shaqada ku tilmaaman qodobkt 9aad ee sharciga lambarkiisu yahay 52 xaggan sare ku qoran.

Qodobka 3aad

*Koobnaanta Guddiga Kacaanka Gobolka Galguduud*

Guddiga Kacaanka Gobolka Galguduud wuxuu ka kooban yahay hial Guddoomiye, oo hore loogu magabay Xeer Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka uuna ku soo taliyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, iyo Xubnaha halkan hoose ku taxan:

Taliyaha Qaybta Xoogga Dalka	Xubin
Taliyaha Qaybta Booliska	»
Taliyaha Qaybta Ciidanka Nabad Suggidda Soomaaliyeed	»
Taliyaha Qaybta Ciidanka Asluubta	»
Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka	»
Taliyaha Waxbarashada Gobolka	»
Agaasimaha Caafimaadka Gobolka	»
Isuduwaha Hawlaha Lacagta	»
Madaxa Hawlaha Guud ee Gobolka	»
Madaxa Hawlaha Shaqada iyo Ciyaaraha ee Gobolka	»
Madaxa Hawlaha Caafimaadka Xoolaha, Dirta iyo Daaqa	»
Madaxa Hawlaha Beeraha	»
Madaxa Hawlaha Biyaha Gobolka	»
Madaxa Hawlaha Boostada iyo Isgaarsiinta	»
Madaxa Xafiiska Siyaasadda Madaxtooyada G.S.K. ee Gobolka	»
Agaasimaha Wakaaladda Horumarinta Beeraha	»
Agaasimaha Wakaaladda Ganacsiga Ummadda	»
Agaasimaha Wakaladda Horumarinta Xoolaha	»
Agaasimaha Wakaaladda Botroolka Ummada	»

Agaasimaha Bangiga Gobolka	»
Madaxa Gaadiidka Dawladda ee Gobolka	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Dhuusa-mareeb	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Ceel-dheer	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Ceel-buur	»
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Caabud-waaq	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Dhuusa Mareeb	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Ceel-dheer	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Ceel-buur	»
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Caabud-waaq	»

Qodobka 9aad

*Xoghayaha Guddiga Kacaanka Gobolka Galguduud*

Xoghayaha Guddiga Kacaanka Gobolka oo hore loogu magacaabay Xeer Guddoomiyaha G.S.K. uuna ku soo taliyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, wuxuu fulinayaa waajibaadka shaqada ku tilmaaman qodobka 9aad ee sharciga lambarkiisu yahay 52 ee xaggan sare ku qoran.

Qodobka 10aad

*Dhaqal gal*

Xeerkani 26-9-1973 ayuu dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 20 Disember 1974.

MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda  
Arrimaha Gudaha  
*S. Gaas Xuseen Kulmiye*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY  
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 60.*  
*Muqdisho, 30 Marso 1975*  
G. Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur  
*Hantidhawraha Guud*

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

Tr. 6 Marso 1975, L. 66.

Billad Maar Hawlkarnimo oo lagu maamuusay Shaqaale ka tirsan ciidammaddii

O. H. R. M.

**GUDDOONSHAHA**

**GOLAHA SARE EE KACAANKA**

MARKUU ARKAY Xaashida kowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka;  
MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 1 ee soo baxay 21ka  
Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 65 ee soo baxay 18ka  
Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEEY Sida geesnimada muranka lahayn iyo  
niyaad daacadda ah ay ku guteen xlikii ka saarraa Ololaha Horumarinta  
Reer Miyiga, Jaallayaal ka mid ah ciidankii Ololaha, iyadoo fulinaya  
go'aannada Kacaanka 21ka Oktoobar, hirgelinayana mabaadi'ida hanti-  
wadaagga;

MARKUU ARKAY Lagama maarmaan inay tahay in si gaar ah loo  
maamuuso qof kasta oo ka geysta kaalin weyn dhismaha iyo horukaca  
dalkiisa;

MARKUU DHEGEYSTAY Go'aanka Guddiga Dallacaadda iyo  
Abaalmarinta ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka;

**WUXUU GUDDOOMIYAY**

**Qodob Keliya**

Jaallayaasha hoos ku qoran waxaa lagu maamuusay Billad maar ah  
ee Hawlkarnimo:

- |                                |             |      |            |
|--------------------------------|-------------|------|------------|
| 1. Cabdi Cumar Cigaal          | W.G. (Wade) | Deg. | Ceerigaabo |
| 2. Jaamac Cali Xaashi          | »           | »    | Garadag    |
| 3. Dhamme Maxamad Kediye Cilmi | Booliska    | »    | Baydhaba   |
| 4. Xid. Ciise Muuse Xujaale    | »           | »    | Golweyn    |
| 5. S. Alifle Buux Dhabar       | »           | »    | Hargeysa   |
| 6. L. Alifle Maxamud Maxamed   | »           | »    | Hargeysa   |
| 7. L. Alifle Cali Ducaale      | »           | »    | Hargeysa   |
| 8. L. Alifle Yuusuf Iidaan     | »           | »    | Hargeysa   |
| 9. K.K. Xirsi Suge             | »           | »    | Seylac     |
| 10. S. Alifle Jaamac Jibriil   | »           | »    | Boosaaso   |
| 11. L. Alifle Rooble Waaliye   | »           | »    | Caluula    |



12. S. Alifle Axmad Aadan	»	»	Jilib
13. L. Alifle Max. Gobey Cawale	»	»	Ceelberde
14. S. Alifle Nuur Axmad	»	»	Baydhaba
15. L. Alifle Salaad Wheliye	»	»	Buur Hakaba
16. L. Alifle Dhaahir Dhoore	»	»	Buur Hakaba
17. S. Alifle Maxamad Cali	»	»	Gaalkayo
18. L. Alifle Xasan Ibraahim	»	»	Gaalkayo
19. K. K. Maxamad Cali	»	»	Beled Weyne
20. L. Alifle Yuusuf Xasan	»	»	Oodweyne
21. K. L. Maxamad Cabdulle	»	»	Buur Hakaba
22. Aadan Xaaji Cabdi	W. Caafim.	»	Baydhaba
23. Maxamad Xasan Maxamuud	»	»	Hargeysa
24. Duraan Cabdullaahi Nuur	»	»	Seylac
25. Amiin Cali Boolaay	»	»	Baraawc
26. Maxamad Sheekh Cabdi	»	»	Gaalkayo
27. Cali Cusmaan Barrow	»	»	Gaalkayo
28. Xaawa Aadan Xaashi	»	»	Boosaaso
29. Cabdi Maxamad Maxamuud	»	»	Qoryooley
30. Axmad Buleymaan Bilaal	»	»	Ceerigaabo
31. Maxamad Xuseen Shirdoon	»	»	Seylac
32. Cumar Ibraahim Rooble	»	»	Hargeysa
33. Tr. Antonio Gonzales	»	»	Kismaayo
34. Maxamuud Cali Maxamad	W. Waxbar.	»	Garbaharrey
35. Cumar Cali Dhiblaawe	»	»	Saakow
36. Mursal Ibrahim Axmad	»	»	Beled Xaawo
37. Cabdi Axmad Saciid	»	»	Ceelwaaq
38. Xasan Cabdalla Bin Cabdalla	»	»	Baardheerc
39. Xasan Maxamad Shiikh Ibraahim	»	»	Waajid
40. Sheekh Cumar Xuseen Macallim	»	»	Xuddur
41. Faarax Sheekh Khalif	»	»	Xuddur
42. Maxamad Maxamuud Axmad	»	»	Buur Hakaba
43. Daahir Muxyaddiin Hadaafow	»	»	Buur Hakaba
44. Axmad Maxamad Cumar	»	»	Kismaayo
45. Faaduma Maxamad Warsame	»	»	Marka
46. Maxamuud Xaaji Muuse Xasan	»	»	W. Weyn
47. Maxamad Saalax Axmad «Charles»	»	»	W. Weyn
48. Nuur Yuusuf Maxamad	»	»	W. Weyn
49. Xaliima Cabdi Caruush	»	»	Baraawc
50. Maxamad Axmad Cariif	»	»	Balcad
51. Cabdullaahi Xasan Saciid	»	»	Jawhar
52. Axmad Xaaji Xabiibullaah	»	»	Cadalc
53. Sheekh Abuukar Sh. Maxamad	»	»	Beled Weyne
54. Cilmi Aadan Axmad Afrax	»	»	Buulo Burti
55. Aadan Faarax Cabdullaahi	»	»	Ceeldheer
56. Cabdi Xaaji Shirwac	»	»	Ceelbuur
57. Aadan Cumar Ibraahim	»	»	Ceelbuur
58. Maxamad Faarax Bahdoon Xirsi	»	»	Gaalkayo
59. Xuseen Cabdi Diiriye Samatar	»	»	Gaalkayo
60. Maxamad Shire Maxamad	»	»	Laascaanood

61. Jaamac Xaaji Maxamad Aadan	»	»	Laascaanood
62. Cali Shire Maxamuud	»	»	Qardho
63. Cabdi Yuusuf Geelle	»	»	Ceerigaabo
64. Cali Jaamac Boqorre	»	»	Ceerigaabo
65. Saalax Axmad Faarax Maxamad	»	»	Garadag
66. Saciid Xaaji Nuur Ducaale	»	»	Laasqoray
67. Xasan Muuse Jaamac	»	»	Hargeysa
68. Axmad Cumar Axmad	»	»	Hargeysa
69. Axmad Cabdullaahi Maxamad	»	»	Hargeysa
70. Cumar Aadan Cali	»	»	Gabiley
71. Cabdi Yuusuf Bulxan	»	»	Gabiley
72. Cali Raage Cumar	»	»	Boorama
73. Xasan Maxamad Xasan	»	»	Bender Beyla
74. Cabdi Cawaale Jaamac Cabdalla	»	»	Qandala
75. Maxamad Xasan Maxamuud	»	»	Ceelberde
76. Tr. Cusman Max. Ax. Xaraare	W. Caafim.	G. Dhexe	OHRM
77. Yuufus Cali Xalane	»	G. Dhexe	OHRM
78. Maxamad Cabdiraxman Xaaji	W. Xoolaha	G. Dhexe	OHRM
79. Axmad Saciid Kaarshe	W. Waxbar.	G. Dhexe	OHRM
80. Cabdullaahi Siciid Cilm	»	G. Dhexe	OHRM
81. Maxamad Axmad Wacays	»	Deg.	Hargeysa
82. Xaawo Cali Faarax	»	»	Afgooye
83. Dhamme Max. Cabdi Muumin	T.Q. Bool. H.	Marka	
84. Dhamme Ibr. Cumar Muuse	NSS Gob. Sh.H.	Marka	
85. L.X. Max. Weli Sh. Max.	Gaad. X. Dalka	Soomaaliyeed	

Muqdisho, 6 Marso 1975.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*S. Gaas Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

**TALOOPYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH**  
**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**BEDDELAAD NAADO DHUL**

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maxamed Nuur Maxamuud, Cali Maxamed Hiraabe, Maxamed Raage Cabdulle iyo Axmed Nuur maalintii 19-1-1966 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Yaso Shiid Jidka Balcad uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Regtang. addimihiisuna ahaayeen 80x30 kuna fadhiye 3.400 mdh., sababtoo ah in uu is beddelay qorashihii Degmadaas.

Sidaas aawdeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WD-148-590-68 kana baxday xafiiskaan, waxay isu bedde-shay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa Regtangulaar addimihiisu yihiin 60x20 kuna fadhiya 1.200 soohdimihii-suna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Maxamuud Raage Cabdulle iyo Axmed Maxamuud.

Koofur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Jidka Balcad.

Muqdisho, 5 Abbril 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Saciid*

(60)

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**N A A D A D H U L**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ibrahim Munye Maxamed, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 1 Maarso 1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Waberi, oo leh qiyaas Sedax gees, kuna fadhiya 612,74 mdh.

Soohdin:

Waqooyi Jid.

Koofur Dhul Wawladeed.

Galbeed Dhul asaga horay loo siiyay.

Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda. Muqdisho, 5 Abbril 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamuud Cabdullahi Dhure, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 18 Jennayo 1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodon, oo leh qiyaas Regtangolar, kuna fadhiya 20x30 =600 mdh.

Soohdin:

Waqooyi Dhul lamb. 49.

Koofur Jid.

Galbeed Dhul Imab. 31.

Bari Dhul lamb. 32.

Qofkii dannaqnayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho. 5 Abbril 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Saciid*

(62)

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Xasan Aadan Cabdi, maalintii 5-13-174, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Yaaq Shiid Jidka, uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Regtang. addimihiisuna ahaayeen 20x16,50 kuna fadhiye 330 mdh., sababtoo ah in uu noqday rabesio.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diyra warqadda lambarkeedu ahaa WHG-3-23-19 kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa 15x32x15,2 addimihiisu yihiin Trabesio kuna fadhiya 352,50 soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo Q. C.

Koofur waxaa ka xiga: Lootada lamb. yahay 33-34.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Lootada lamb. yahay 28.

Muqdisho, 5 Abbril 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*BEDDELAAD NAADO DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maxamed Nuur iyo Maxamed Xasan Moxamuud maalintii 21-2-1967 loono ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Yaq Shiid Jidka Balcad uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Regtang. addimihiisuna ahaayeen 80x30 kuna fadhiye 2400 mdh., sababtoo ah in uu is beddelay qorshihii Degmadaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa MWD-193-589-68 ee 11-5-1968 kana baxday xafiis kaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa Regtangular addimihiisu yihiin 60x20 kuna fadhiya 1,200 soohdimihii-suna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Moxamed Salax.

Koofur waxaa ka xiga: Maxamed Raage iyo Axmed Maxamuud.

Galbeed waxaa ka xiga: Jidka.

Bari waxaa ka xiga: Jidka Balcad.

Muqdisho, 5 Abbril 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Saciid*

(64)

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*BEDDELAAD NAADO DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Moxamuud Raage Cabdulle iyo Axmed Moxamuud Nuur maalintii 21-2-1967 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Yaq Shiid Jidka Balcad uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Regtang. addimihiisuna ahaayeen 80x30 kuna fadhiye 2,400 mdh., sababtoo ah in uu iska beddelay qorashihii Degmadaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa MWD-194-576-68 ee 11-5-1968 kana baxday xafiis kaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa Regtangular addimihiiisu yihiin 60x20 kuna fadhiya 1.200 soohdimihii-suna sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Moxamed Nuur Mohamed iyo Moxamed Xasan.

Koofur waxaa ka xiga: Moxamed Nuur Moxamed iyo Saxibadiisa.

Galbeed waxaa ka xiga: Jidka.

Bari waxaa ka xiga: Jidka Balcad.

Muqdisho, 5 Abbril 1975.

(65) Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Saciid*

---

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

### N A A D A D H U L

Waxaan dad Weynaha la ogeysinayaa in uu keenay arji Xafiiska Guddomiyaha Degmada B. Weyne Jaallaha la yirahdo Khalif Roble Warfa u ku weydiisanaayo cad dhul ku jaalo Degmadatan u doonaayo in u ku dhisto guri dhagax ah, sida u sheegayo Sharciga Dhulka u degsan, waxaa si caddan ah u tilmaamaya dhulka asaga ah naqshad laga helo Xafiiska Guddomiyaha oo lagu arkikaro in ninkii doonaayo oo dani uga jirto in u arkikaro.

Nadada iyada ah waxay ku dhegenaaneyna Alwaaxa Dawladda Hoose ee Degmada B. Weyne 30 (soddon) maalmood laga billaabo 19 Maarso 1972 ilaa 18 Abbril 1972.

B. Weyne, 19 Maarso 1972.

(66) Guddomiyaha Dawladda Hoose ee B. W.  
*Waxaa saxixay Xasan Axmed Cige*

---

### MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

---

Waxaan arkay dacwadan:

Markaan arkay waxay ku saabsantahay iyo ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta 2aad, waxaan ogaaday iney tahay shaqadeyda.

Arkay qodobka D. L. 9-9-65 n. 2;

Waxaan cadeynayaa dhumidii buugga lacagta (ammortamento libretto) n. 5416, Shs. 5.900.

Waxaan amrayaa in loo sameeyo buugga ninka la yiraahdo Cali Xeyle Wardheere, muddo 30 beri ah, ka bilaabato maalinta lagu shaa-ciyo Faafinta Rasmiga, haddaan qof kale oo ku sheeganayaa usan jirin.

Waxaa kale ka codsanayaa in Buugga gacanta looga saaro Cali Xeyle, ama qof kale oo ka sita Wakaalad.

Muqdisho, 8 Abbril 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda  
*Dr. Yasiin Shire Faarax*

(67)

---

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

---

Waxaan arkay dacwadan:

Markan arkay waxay ku saabsan tahay Ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Soomaalidda Laanta Kismayo, ee aan ogaaday in ay tahay shaqa Xafiiskan;

Markan arkay qodobka 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

Waxaan caddeynayaa dhumidda Jeeg. wareegto L. 3530 ku qoran lacag dhan 500 (shanboqool) Shs.

Waxaan Amraya in loo cusbooneysiyo Cabduraxmaan Moxamed Xasan muddo 15 (shaniyotobaan) beri ah oo laga bilaabo markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah (Bollettino), haddan la helin qof kale oo jecgaas sheegtaa.

Waxaan kaloo caddeynayaa in jeegaas gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qof kale oo ka sitaa wakaalad aan shaki ku jirin.

Kisimaayo, 20 Abbril 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka J. Hoose  
*Dr. Xuseen Faarax Hilowle*

(Ku celin 67)